



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA
KU SAABSAN

**ANSIXINTA GUNNO XILEEDDA HABDHOWRAHA IYO LABADA
HABDHOWRE KU-XIGEEN EE GOLAHA SHACABKA.**

Muqdisho, 30 Abriil 2015

A handwritten signature in black ink, appearing to be the name of the official responsible for the document.

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SHACABKA

- Markuu qaddariyey:** Howlaha culus uu Xeer-Hoosaadka Goluhu u xilsaarayo Habdhowraha iyo Labada Habdhowre Ku-xigeen ee Golaha Shacabka;
- Markuu arkay:** Go'aanka Guddiga Joogtada Kulankiisa 57aad ee 30^{ki} Abriil 2015 ee ku jaangooyey Gunno Xileedda Habdhowraha iyo Labada Habdhowre Ku-xigeen ee Golaha Shacabka;
- Tixgeliyey:** Talada Guddoomiye Ku-Xigeenka Koowaad iyo Guddoomiye Ku-Xigeenka Labaad ee Golaha Shacbiga;
- Dhegeystay:** Soojeedinta Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka.

WUXUU XEERIYEEY QARAARKAN

Qodobka 1-aad

Laga bilaabo Kowda Maajo 2015 Habdhowraha iyo Labada Habdhowre ku-xigeen waxay bishiiba yeelanayaan gunno-xileedda halkan hoose ku xusan:

1. Habdhowraha Golaha Shacabka \$1,500.00/- (Kun iyo Shan Boqol) Bishii;
2. Habdhowre ku-xigeennada midkiiba \$1,000.00/- (Kun Doolar) Bishiiba.

Qodobka 2-aad

Kharajka gunnooyinka Habdhowraha iyo Labada Habdhowre Ku-xigeen waxaa laga bixinaya Madax-xigaha 113 ee Miisaaniyadda Golaha Shacabka.

Qodobka 3-aad

Qaraakan wuxuu dhaqangalaya markuu saxiixdo Guddoomiyaha Golaha Shacabka.

M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jama
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

